

Magaca Buugga:

4.5 WAA QARAN DUMIS

Qoraa: WQ: Salman Mohamud Adow (Alberto Roman)

Gmail:romanjr1444@gmail.com

Phone number:+254759278163.



Qabiilku wuxuu ahaa hab bulsho oo ujeedkiisu ahaa ilaalinta danaha dad gaar ah, balse maanta wuxuu isu beddelay cudur qarannimo disha, dadnimana dilaya. Maanta Soomaaliya waxay wajahaysaa burbur dhameystiran oo uu sal u yahay nidaamka qabiilka, gaar ahaan nidaamka 4.5, oo ah magaca si fool xun ugu qoran dastuurka, maskaxda, iyo maamulka.

Buuggan wuxuu si cilmi ah u falanqeyn doonaa:



Edit with WPS Office

- Halka uu qabiilku ka yimid
- Sida uu u beddelay nolosha bulshada
- Doorka uu ku leeyahay burburka dowladnimada
- Sida lagu ciribtiri karo nidaamka 4.5 iyo qabiil ku dhisan kala sooc

Buuggan waa daahfur cusub oo fura indhaha umada soomaaliyeed , anoo soo aruuriyay soona koobay xogo cilmiyeed ah, dareen dhalinaya, haddana xal keenaya.

Si ay bulshadeenu indhaha ugu furanto oo ay oga tagaan caabuqan faafay waa inan bulshadeenu ku dhirigelinaa iney iska dhaafan qabiilka qofkii qabiil sheegana waa in looga digo loona sheego inu yahay wax xun.



Kadib markad dhameeyso akhrinta buugan waxaan hubaa inadan taageri doonin qabiilka iyo waxwalbo dilayo , burburinayo ama dhibateynayo naftaada iyo walalahaga .

MAHADNAQ

Waxaan halkan ugu mahadcelinayaaa allah swt oo mahad oo dhan ay usugate . Marka labaad wxan umahad celina dhamaan umada soomaaliyed meel walboo ay jogto kuwaaso idhirigeliya marwalba .

Waxaan si qaas ah ugu mahad naqaya ;

- Hooyadey kheyro abdi ahmed
- Aaba mohamud adow abdullahi



- Walalkey mohamed xaish bile

Kuwaaso ilasoo halgamay oo isoo gaarsiyey heerka an nolosha ka taganahay.

Xuquuq dhawr

Xuquuqda buugaan way dhawrsantahay waxayna u dhawrsantahay qoraa ; salman mohamud adow (AlbertoRoman). waxaa ka mamnuuc ah dhammaan waxyaabaha lidka ku ah ujeedada qoraaga. Lama daabacan karo iyadoo aana fasax laga haysan qoraaga buuggaan.haddii ay noqoto in aad wax kala baxdaa waa inaad Xustid magaca buugga iyo magaca qoraaga.Intaas wixii ka badan waa gaf, loo gafay qof qoraal waqti galiyay oo ku daalay.



AFEEF

Waxaan ka afeefanaya qalad walbo ad ku aragto buuga ha noqdo qoraal , erey ama ficil maahan waxan uqasday ee isku day ina ka qeyb qadato tafatirida buuga . Waxaa laga yaaba inad aragto Shaqalada qaar oo isdaba marsan wan ka raali gelina haku wareerin ee si degan u aqri .

QAAB-DHISMEEDEKA BUUGGA

CUTUBKA 1: TAARIIKHDA QABIILKA

- Qabiilka: Meesha uu ka yimid, doorkii uu ku lahaa sooyaalka aadanaha
- Qabiilka Soomaalida: Yaa curiyay? Sidee lagu kala baxay?



- Difaaca iyo colaadeynta: Qabiilka berigii hore vs maanta

CUTUBKA 2: SOOMAALIDA IYO QABIILKA – CAADAD MIYAA MISE WAA CUDUR?

- Sida qabiilku u noqday hidde
- Hab-dhaqanka reer guuraaga iyo qabiilka
- Fikirka “Qabiil la’aani ma jiro” iyo burburka maskaxda bulshada

CUTUBKA 3: QAABKA 4.5 – CADAALAD MIYAA MISE CUNSURIN?

- Sida loo sameeyay nidaamka 4.5



- Caddaalad darada, kala qeybsanaanta iyo nacaybka uu dhalay

- Dadka aan buuxin “4.5” xaggee bay ku dambeyaan?

CUTUBKA 4: CUNSURIN IYO QABYAALAD – WALAALO ISDILAY

- Cunsuriyadda qabiilka ku dhisan

- Sida ay qabyaaladda u disho fursadaha, kartida, iyo kalsoonida bulshada

- Qabiilka sida loo adeegsado si loo kala fogeeyo bulshada

CUTUBKA 5: DOORKA QABIILKU KU LEYAHAY



DUMINTA QARANNIMADA

- Maxaa ka qaldan dowlad dhisan , qabiilna ku saleysan?
- Maamul goboleedyada iyo qabiilka: wada shaqeyn mise kala go’
- Tusaalooyin dhab ah oo muujinaya sida qabiilku u dumiyay hay’adihii dawliga ahaa

CUTUBKA 6: FAA’IIDOOYINKA IYO KHASAARAHA QABIILKA

- Halkee buu qabiilku ka faa’iiday?
- Goorma ayuu dhib noqday?



- Qabiilka iyo musuqmaasuqa: saaxiib is og?

CUTUBKA 7: QABIILKA IYO AQOONTA – LABO IS DIIDAN

- Cilmi iyo qabiil: Maxaa la isku diiday?
- Qabiilka oo la xushmeeyo halkii aqoon lagu qiimeyn lahaa
- Sidee loo furaa dariiqa aqoonta ee ka madax bannaan qabiilka?

CUTUBKA 8: MAXAA SABABA IN QOF QABIIL KU FAKARO?

- Cilmi nafsiga qabyaaladda: Maxaa sababa?



- Jahliga iyo duruufaha bulshada

- Dhaqanka, diinta iyo bulshada oo qofka ka dhigo cunsuri aan la dareemin

CUTUBKA 9: HALKAAN KA BILAABAYNAA ISBEDDELKA – SIDEEN U TIRTIRI KARNAA QABIILKA?

- Talaabooyinka dhabta ah ee lagu tirtiri karo qabyaaladda

- Waxbarashada, hanuuninta, iyo doorka warbaahinta

- Isbedelka ka bilowda qofka

CUTUBKA 10: HADDII AAN KA TAGNO QABIILKA –



MAXAA DHACAYA?

- Mustaqbalka Soomaaliya haddii laga baxo qabyaaladda
- Midnimo dhab ah, horumar joogto ah
- Sheekooyin guul leh oo ka dhacay dunida kale oo laga tirtiray qabiil

CUTUBKA 1: TAARIIKHDA QABIILKA – ASAL, ABUURID IYO UJEEDDO

Qabiilku ma aha erey cusub oo maanta la curiyay.
Waa nidaam bulsho oo fac weyn leh, kaas oo ka soo

jeeda xilliyo hore oo ay aadanuhu u baahnaayeen kooxo ilaalinaya, garab siiya, una adeegaya danta guud ee xubnaha qoyska ama beesha. Dadku markay ahaayeen reer miyi ama baadiye ku nool, waxay u baahnaayeen xiriir dhiig, mid damiir ah iyo mid dano wadaag ah si ay ugu noolaadaan deegaanka adag ee ay la tacaalayeen.

1.1 Qabiilka: Halkee Buuga Ka Furmay?

Marka la doodaayo taariikhda qabiilka, waa in la fahmaa in uu yahay nidaam bini'aadamku si dabiici ah uga dhex abuuray baahidooda nololeed. Sida uu qabo saynisyahanka caanka ah ee Ibn Khaldun, qabiilku wuxuu ka dhashay baahida dadku u qabaan asabiyah — taasi oo ah xurguf ku saleysan dan-wadaag iyo xeer-hoosaadyo qabiil.

Soomaalidu waxay ka mid yihiin ummadaha ugu qabiilsan caalamka, iyadoo qabiilku yahay "ID-da aqoonsiga" ugu horeeya ee qofka Soomaaliga ah. Halkii laga oran lahaa: "kuma tahay?" waxaa laga



oranayaa “Qabiilke tahay?”

1.2 Qabiilka Soomaalida: Yaase Curiyay?

Soomaalida waxay sheekooyinkooda ka dhaxleen silsilado abtirsiin ah oo mararka qaar gaaraya ilaa Qahtan ama Sam bin Nuh, waana calaamad muujinaysa sida qabiilka loogu xeeriyay diinta, taariikhda, iyo dhaqanka. Abtirsiintan waxa ay noqotay mid aan si fudud loo murmin, balse u adeegeysa hadaf qabiil oo aan marna loo isticmaalin xaqnimo iyo caddaalad.

Ma jiro hal qof ama koox si rasmi ah u abuuray nidaamka qabiilka ee Soomaalida. Waa dhismo bulsheed oo ka yimid wax-yaabihii ay ummaddu u baahneyd xilligii aan la lahayn dowlado rasmi ah, balse maanta noqday sunta ugu weyn ee baabi’isay qaranimada.

1.3 Qabiilka: Badbaado Mise Balaayo?

Waxaa lama huraan ah in qabiilku uu lahaa xilliyo uu ahaa ilaalin iyo garab. Wuxuu ahaa meesha aad u cararto marka aad dhib gasho. Wuxuu ahaa waarid xitaa marka ehelkaa dhinto. Wuxuu ahaa difaac, cunto, iyo qaddarin. Laakiin...

Markii dowladnimada ay timid, markii sharciga la qoray, markii dhallinyarada ay aqoon heleen – qabiilkii waxaa loo baahnaa inuu ka haray meelahaas, balse wuu daba galay. Waxa uu noqday cudur. Wuxuu noqday hub siyaasadeed. Wuxuu noqday xadgudub lagula kaco cid walba oo aan beeshaada ahayn.

1.4 Qabiilka iyo Diinta Islaamka

Islaamku wuxuu si cad u reebay in la is qiimeeyo iyadoo ku saleysan qabiil ama midab. Nebi Maxamed (NNKH) wuxuu yiri:



"Qofka ugu karaamada badan Ilaahay agtiisa waa kan ugu dhawrsan badan."

Haddaba, Soomaalidu miyey Islaamka fahmeen mise qabyaaladey ku bedesheen? Waxaa murugo ah in dad badan ay diin u baddaleen qabiil, laguna qiimeeyo cidda aad tahay, halkii laga eegi lahaa camalkaaga iyo damiirkaaga.

Gunaanad Cutubka 1

Qabiilku wuxuu ahaa hal abuur lagu badbaado, laakiin maanta wuxuu noqday hab lagu dumiyo bulsho. Waa uu is rogay, wuxuu lumiyay micnihiisii asalka ahaa, wuxuuna noqday hanti dad gaar ah u adeegsadaan burbur iyo kala fogeyn.

Waa waqtigii aan si dhab ah u fahmi lahayn meesha uu qabiilku ka yimid, meesha uu nala marayo, iyo meesha uu inoo wado. Cutubyada xiga waxay si qoto dheer u faahfaahin doonaan cunsuriyadda,



nidaamka 4.5, khasaarihii soo gaaray qaranimada, iyo waddada laga bixi karo.

CUTUBKA 2: SOOMAAALIDA IYO QABIILKA – CAADAD MIYAA MISE CUDUR?

Qabiilku ma yahay wax lagama maarmaan u ah nolosha Soomaalida mise wuxuu noqday cudur maskaxeed, mid bulsho, iyo mid siyaasi ah?.

Ma waxaa la dhaxlay qabiil iyo magac, mise waxaa la dhaxlay ciqaab iyo kala sooc?.

Cutubkan wuxuu dul istaagayaa su'aalo ay dad badan iska indho tiraan: sababta qabiilku u noqday caado, sababta loo difaacayo xitaa marka uu dhaawacayo, iyo sababta qofka Soomaaliyeed u dareemayo awood qabiil balse uu dareemayo tabar darro qaran.

2.1 Qabiilka: Dhiig, Dhaqan iyo Maskax La Dhaqay



Soomaalidu waxay qabiilka u fahmeen sida neef geeljire leeyahay: haddii aanad lahayn qabiil “waad lumisay”. Waxaa jirta odhaah si aad u murugo leh:

“Nin aan qabiil lahayn, waa nin aan jirin.”

Taas micnaheedu waa in qofka qabiil la,anta ah uusan ku lahayn qiimo bulsho, xiriir dadnimo, ama difaac. Tani maaha dhaqanka Islaamka, mana aha fikirka dowladnimo. Waa maskax la dhaqay — meel laga dhigay qabiilku inuu yahay badbaado, halka dhabta ay tahay inuu yahay silsilad.

2.2 Qabiilku Maaha Diin – Wuxuu Noqday Sida Diinta.

Qabiilka Soomaalida waxaa lagu raadiyaa:



- Guur

- Shaqo

- Siyaasad

- Saaxiibtinimo

- Badbaado

Waxaad guursan kartaa qof dabeecad xun balse beel kuu dhow. Waxaad heli kartaa xil aadan u qalmin sababtoo ah waxaad tahay qabiilka saxda ah. Waxaad se noqon kartaa aqoonyahan cajiib ah, balse la iska indho tiro sababtoo ah “beeshaadu ma ahan mid xil leh”.

Tani maaha caado, waa cudur. Waa fikir cunsurin ah oo bulsho dhan ka dhigay iney qiimeeyaan dhiig iyo magac halkii laga qiimeyn lahaa maskax, camal, iyo



karti.

2.3 Sida Qabiilka U Noqday Caado Dhalinyarada

Dhalinyarada Soomaaliyeed – kuwa dhashay burburka kadib – waxay u koraan jawi ay barten in qabiilku yahay difaac, sharaf, iyo xitaa madadaalo. Waxaa loo sameeyaa “groups qabiil ku saleysan”, waxaa loo sameeyaa “gaashaanbuur qabiil”, waxaana loo adeegsadaa TikTok, Facebook iyo WhatsApp.

Markii cudurka laga dhigo ciyaar, daaweyntiisuna aad ayey u adag tahay. Qabiilku wuxuu galay qeyb kasta oo nolosha ah: suugaanta, muusigga, siyaasadda, iyo xitaa ciyaaraha.

2.4 Qabiilnimadu Ma Xoojiyaa dadka Mise Wuu Xumeeyaa?

Waa run in qabiilku abuuri karo taageero iyo dareen

“la ixtiraamo”, balse wuxuu lumiyaa:

- Kalsoonida dadweynaha
- Cadaaladda
- Xulashada dad karti leh
- Midnimada ummadda

Tusaale: haddii aad leedahay “ninkaan qabiilkiisa dartii baan u necbahay” — maka fikiraysaa sidaa la mid ah haddii uu muslim yahay? maxaa ka reebay damiirka?

Qabiilku wuxuu duminayaa:

- Jacaylka ummadda



- Is-aaminaadda bulshada

- Rajada dhalinyarada

2.5 Waa Maxay Sababta Soomaalida U Difaacaan Qabiilkooda Xitaa Marka Uu Xun Yahay?

Waxaa jira dhowr sabab:

Cabsi: “Haddii aan qabiilkayga difaacin, cid i difaacaysa ma jirto.”

Dhaqan: Waxaad ku kortay gurigii, xaafaddii iyo deegaanka lagu tilmaamayay beelaha kale sida “kuwaasi waa dad liita”.

Xiriir: Qabiilku waa sida internet — mar walba waxaad rabtaa inaad ku xirnaato meel aad ka



dareento taageero.

Xog la'aan: Dad badan ma haystaan aqoon ku filan si ay u fahmaan in qabiilku yahay nidaam been ah, oo lagu xukumayo dadka si caadifad ah, oo aan wax sal ah lahayn.

Gunaanad Cutubka 2

Qabiilku wuxuu u ekaan karaa caado la dhaxlay, balse marka la galo qoto-dheeri, waa cudur la qariyay. Waa cudur lagu dhaxlo magac, lagu raadsado xilalka, laguna burburiyo mustaqbalka. Ma jiro dal horumaray oo qabiilku sal u yahay, mana jiro dad mideysan oo kala faquuqoodu yahay dhiigga.

Cutubkan wuxuu ifinayaa: qabiilku ma ahan mid dabiici ah sida biyaha ama hawada. Waa wax la sameeyay, la xoojiyay, la isticmaalay, laguna dhaqmo.



CUTUBKA 3: QAABKA 4.5 – CADAALAD MIYAA MISE CUNSURIN?

Markii burburkii dowladnimo ee 1991-kii dhacay, waxa la waayay midnimadii siyaasadeed, sharciyaddii dawladnimo, iyo kalsoonidii shacabka Soomaaliyeed ay isku qabeen. Waxaa la soo dhex dhigay qaab cusub oo lagu tilmaamay "caddaalad beeleeed", laguna magac daray nidaamka 4.5. Laakiin su'aasha salka leh waxay tahay: nidaamkaan miyaa cadaalad keenay, mise cunsuriyad qabiil oo sharciyeysan?

3.1 Waa Maxay Nidaamka 4.5?

Nidaamka 4.5 wuxuu yahay hab-qaybsiga awoodda siyaasadeed ee Soomaaliya, waxaana loo sameeyay si beelaha waaweyn ay awood u yeeshaan, halka beelaha loo yaqaan "yar yar" la siiyo nus-xaq.



Qaabka:

4 beelood waa “waaweyn” – waxay helaan tiro siman.

Beesha 5aad (oo aan ka tirsaneyn afarta waaweyn) waxay helaan “0.5” – nus xaq.

Tani micnaheedu waa: dad dhan, taariikh leh, maskax leh, dad leh af, dhaqan, suugaan iyo dhul – waxaa loo aqoonsaday inay “kala badh” yihiin bini'aadamnimada dadka kale!

3.2 Sababtii Loo Aas-Aasay 4.5

Markii ay beelaha kala duwan isku mari waayeen awood qaybsiga, waxaa la keenay nidaamkan si loo qaboojiyo colaadihii. Waxaa lagu dhisay:

- Qanci beel walba si ay uga mid noqoto dowlad la



dhisayo

- Ka fogaanshaha dagaallo qabiil oo hor leh
- Samaynta balan siman oo beeled, ee aan ku salaysnayn cod dadweyne ama karti

Laakiin sida la ogyahay, nidaam kasta oo ku dhisan xasilinta beelaha halkii uu ka xasilin lahaa cadaaladda shacabka, wuxuu noqonayaa mid ku meel gaar ah — balse 4.5 wuxuu noqday nidaam rasmi ah oo xitaa lagu qoray dastuurka KMG ah.

3.3 Maxaa Lagu Helay? Maxaa Lagu Waayay?

Waxa laga helay:

Dhammaan beelaha waaweyn waxay dareemeen

iney helayaan "xuquuqdooda".

Waxaa suuragal noqotay in la dhiso dowlad dhexe kadib sanado burbur ah.

Laakiin waxa laga waayay:

Dadkii la yareeyay waxay dareemeen nacayb iyo ka faquuqid.

Kartidii laga fiirsan lahaa, waxay noqotay magaca la fiiriyo.

Qaran ayaa loo hibeeyay qabiil.

Natiijadu waxay noqotay: Soomaali dowlad leedahay, balse aysan dadkeedu dareemin cadaalad.



3.4 Dhibaatooyinka Nidaamka 4.5

- Caddaalad la'aan sharciyeysan: Beelaha qaar si rasmi ah ayaa loo dulmiyay, halka kuwa kale loo sharciyeeyay iney dadka kale ka sarreeyaan.
- Kartidii oo la laalay: Ma noqon kartid madaxweyne haddii aadan ka imaan "beel sax ah", xitaa haddii aad tahay midka ugu aqoonta badan.
- Dhismaha dawlad aan sal adag lahayn: Dowlad lagu dhisay qabiil ma yeelato kalsooni bulsho, maxaa yeelay waxay difaacdaa beel, ee ma difaacdo shacabka.
- Kala qaybsanaan joogto ah: 4.5 wuxuu sii fogeeyay beelaha halkii uu mideyn lahaa.

3.5 Haddii Nidaamkan La Sii Wado, Maxaa Dhacaya?



- Horumar siyaasadeed ma imaan doono.
- Dadka da'yarta ah waxay u arki doonaan qaranimadu inay tahay been.
- Dhibaataada ugu weynna waxay noqon doontaa: aqoonta, kartida iyo hufnaanta waxay la safan doonaan is-qarinta, musaafuris, ama niyad jab.

3.6 Ma Jiraan Waddamo Kale oo Sidaan Yeelay?

Qaar ka mid ah wadamada kale waxay qaateen nidaamyo beeled si kumeel gaar ah, balse dhammaantood waa ka guureen.

Lebanon: Waxay leedahay nidaam ku saleysan diin iyo beelo, taasoo keentay burbur iyo colaado aan dhamaan.



Iraq: Nidaam beeled ayaa burburiyay isku duubnidi shacabka.

Soomaaliya waa inay ka barataa khaladaadkaas. Qabiil waa la tixgelin karaa siyaasad ahaan, balse ma noqon karo sharciga aasaaska dowladnimada.

Gunaanad Cutubka 3

Nidaamka 4.5 waa sharciyeyn cunsuriyadeed oo qabiil ku saleysan. Waa nidaam aan cadaalad aheyn, aan aqoon ku dhisneyn, aan sinaan iyo xuquuq la wadaag ahayn. Waa nidaam burburinaya niyadda shacabka, maskaxda dhallinyarada, iyo haybadda qaranimo.

Haddii Soomaali dooneyso dowlad dhab ah, waa in laga gudbo 4.5. Haddii aan nidaamkaas meesha laga saarin, qarankaas waxaa sii dilaya cudur qarsoodi ah oo lagu magac daray “nabad siyaasadeed”.



CUTUBKA 4: CUNSURIN IYO QABYAALAD – WALAALO ISDILAY

Waxaa la yiri: “Qabiil waxba kuma lihid, balse cunsuri ayaad noqon kartaa.” Sidaas darteed, qabiilku wuu jiri karaa, balse marka laga dhigo miisaan lagu



cabbiro qofnimadaada, kartidaada, iyo noloshaada, wuxuu isu beddelaa cunsuriyad. Qabyaaladdu waa muuqaalka cunsuriyadda Soomaaliyeed: waa dan gaar ah oo lagu dhex baadi-goobo magaca qabiilka, iyadoo lagu dulminayo dadka kale.

4.1 Maxay Tahay Cunsuriyad? Maxay Tahay Qabyaalad?

Cunsuriyad waa marka qof lagu qiimeeyo oo lagu kala sarreeyo iyadoo lagu saleynayo isir, qabiil, jinsi, ama midab – halkii laga eegi lahaa camalkiisa iyo dabeecaddiisa.

Qabyaalad waa ficilka ama garab siinta qof ama koox sabab kaliya ah inay yihiin “qaraabo, qabiil, ama dad ila mid ah”, xitaa marka ay khaldan yihiin.

Qabyaaladdu waa foolxumo, balse cunsuriyadda waa cudur; midkoodna ma lahan meel ay ku qurux



badan yihiin. Waa labo fikir oo sharka isku darsaday
— dhulkana lagu halligay.

4.2 Sida Ay U Baabi'iyeen Dadka iyo Dowladnimada

Cunsuriyadda iyo qabyaaladda ayaa sababay:

In qof lagu dilo magaca beel uu ka dhashay.

In laga horyimaado horumarka haddii qof aan
“qabiilka saxda ah ka imaan” uu hormuud noqdo.

In la dilo garsoor, caddaalad iyo karti.

Tusaale: Madaxweyne ama wasiir aad u wanaagsan,
haddii uusan “qabiilkeyga” ahayn — maxaa ka
dhaxeeya isaga iyo eedeymaha beel ahaan loo
sameeyo?



Maanta, siyaasiyiinta qaarkood waxay sheeganayaan in beel ahaan loo weeraray — mana sheegayaan inay xukun xumeeyaan. Waxaa loola jeedaa: Qabyaaladdu waa difaaca dambiyada, cunsuriyadduna waa sharciyeynta dulmiga.

4.3 Cunsuriyaddu Maaha Xukunka Qof Kale – Waa Dhibaataada Nafsigu Qofka Cunsuriga Ah

Qofka cunsuriga ah:

Wuxuu dareemaa cabsi iyo kalsooni darro.

Wuxuu ku nool yahay “qabiilkiisa” halkii uu ku noolaan lahaa dadnimadiisa.

Wuxuu la dagaallamaa kartida dadka kale, sababtoo ah wuxuu is leeyahay: “Haddii ay kuu guuleystaan, adiga waxba ma tihid.”



Qabyaaladdu maaha dambi sharciga kaliya ka dhan ah, waa dambi ruuxa dilaya, maskaxda adoonsanaya, iyo qalbiga qudhmaya.

4.4 Qabyaaladdu Maaha Saaxiib – Waa Sun Socoto

Waxaa laga yaabaa in qof qabyaaladaysan uu kuu sheego:

“Waan jecelahay reer hebel, balse reer hebel ma aaminaayo.”

Tani waa eray cunsuri ah oo lagu xardhay hadal “dhaqan ahaan u wanaagsan”, balse dhab ahaantii dilaya kalsoonida iyo isku duubnaanta.

Qabyaaladdu waxay dishaa:



Xiriirka bulshada

Fursadaha dhalinyarada

Mustaqbalka wadajirka ah

Qabyaaladdu waxay tahay: qofka saxda ah meesha laga riixo sabab uu qabiilkiisu qaldan yahay – halka qofka qaldan meesha loo saaro sabab uu qabiilkiisu saxan yahay.

4.5 Doorka Cunsuriyadda ee Warbaahinta iyo Siyaasadda

Warbaahinta Soomaalida qaarkeed waxay u adeegsataa erayo cunsuri ah:

“Beeshaasi waa la gumaaday”



“Beeshaasi waxay leedahay xaq gaar ah”

“Reer hebel waxay mudan yihiin xil”

Sidoo kale, siyaasiyiinta waxay u tartamaan si qabiil lagu taageero — ma ahan barnaamij siyaasadeed ama himilo qaran.

Natiijadu waxay noqotay: “qabiil ayaa noqday xisbiga rasmiga ah ee siyaasadda Soomaaliyeed.”

4.6 Sidee Lagu Daawayn Karaa Cunsuriyadda iyo Qabyaaladda?

Dareen la’aanta lagu furdaamiyo: Dadka ha la baro in qabiilku yahay qayb nololeed, balse aanu ahayn qiyamka qofka.



Diinta la adeegto: Islaamku wuxuu la dagaallamayaa cunsuriyadda. Waxa uu barayaa in dadka lagu qiimeeyo taqwadooda.

Aqoonta loo adeegsado: Barashada cilmi-nafsiga bulshada, taariikhda dulmiga, iyo waddamada ka adkaaday cunsuriyadda.

Dood furan: Ha la bilaabo doodaha ka dhan ah qabyaaladda — warbaahinta, jaamacadaha, masjidyada.

Hoggaan suuban: Qofka aan cunsuriga ahayn ha noqdo hogaamiye, halkii qabyaaladuhu noqon lahaa baalasha uu ku duulo.

Gunaanad Cutubka 4

Qabyaaladdu iyo cunsuriyadda waa labo xanuun oo

isku faruuray, midna ma dhaco la'aanta midka kale.
Waa labo dila qofnimada, dumiyo dowladnimada,
dhaawacana midnimada.

Dadka Soomaaliyeed waxay leeyihiin hal fursad: inay doortaan qaran ku dhisan caddaalad iyo aqoon, ama inay sii ahaadaan dad lagu kala saaro qabiil, laguna kala qiimeeyo dhiig.

CUTUBKA 5: DOORKA QABIILKU KU LEYAHAY



DUMINTA QARANNIMADA

Qaranimadu waa isku dhafka dad, dhul, calan, dastuur iyo hay'ado adeegaya ummadda. Laakiin marka taas la beddelo, laguna dhiso beelo iska shaki qaba, oo aan is aaminayn, wuxuu qaranku isu beddelaa tuulo qabiilo leh, dowladna ma noqon karto – ee waxay noqotaa xarun dhexdhexaadis beelaha.

Soomaaliya waxay tusaale nolosha dhabta ah ka bixisay sida qabiilku u dumiyo qaran: dowlad kastaa waxay isku dayday inay “qabiil u noqoto” halkii ay shacabka u noqon lahayd.

5.1 Qaran-Dumis Sharciyeysan

Markii la aqbalay in la dhiso dowlad ku saleysan beelo, waxaa meesha ka baxay:

- Hal-abuur qaran oo dadka mideeya



- Xulasho karti ku saleysan

- Kalsooni shacabka

Waxaa la helay:

- Qabiil sheegasho

- Beel ku qaraabo tagid

- Hay'ado u shaqeeya beel gaar ah

Qabiilka wuxuu noqday tiirka sharciyeysan ee lagu dumiyay dowladnimada.

5.2 Maxay Tahay Dowlad Ku Dhisan Qabiil?



●Madaxweyne wuxuu u yahay beel uu kasoo jeedo, halkii uu u ahaan lahaa qaran.

●Wasiir lagu magacaabo "xaq beeled", halkii lagu magacaabi lahaa karti iyo aqoon.

●Qandaraas la siiyo shirkado ay wataan beelaha "xukuma", xitaa haddii aysan wax qaban karin.

●Hay'ad kasta waxay u shaqeysaa "dadka la moodo inay iyada ka tirsan yihiin."

●Tani waa dowlad dadkeedu kala cabanayo, dowlad aan ku dhisnayn cadaalad, dowlad ku shaqeysa magac beeled.

5.3 Qabiilku Ma Wuxuu Diley Dowladnimadii Soomaaliya?



Haa.

Waxay ahayd qabiil dartiis:

In dowladdu u kala muuqato dad si gaar ah loo bartilmaameedsaday.

In la isugu geeyo dagaal, kaliya sababta ah "beeshaa dowladdu ku badan tahay."

In shaqo la waayo, xitaa adigoo u qalma, sababtuna tahay "qabiilkaaga ma wato."

Sidaas ayay qabiilku u diley kalsoonidii shacabka ee dowladda.

5.4 Maxaa Lagu Waayay Qabiil-Siyaasadeynta?



●Xukun la'aan: Qabiilka wuxuu hor istaagay samaynta nidaam la isku halleyn karo oo xukuma si caddaalad ah.

●Kala qoqobnaan: Qabiilku wuxuu bulshada u kala qeybiyay “annaga iyo iyaga”, taasoo micnaheedu yahay in ummaddii laga dhigay labo daraf oo isku shaki qaba.

●Xil aan la xisaabtamin: Qof xil haya wuxuu leeyahay “waan idin matalayaa”, beesha uu ka yimidna difaac buuxa ayay siisaa — xitaa haddii uu musuqmaasuq sameeyo.

●Xarumaha dowladdu waxay noqdeen goobo beeled: Tusaale: Wasaarad gaar ah ayaa beel lagu xardhay, shaqaalaheedana lagama helayo dadka kale.

5.5 Maxaa Lagu Xalin Karaa?



Dowlad ku saleysan dadnimo, ma ahan beelnimo.

Qabiilku ha noqdo astaan bulsho – ee yuu noqonin nidaam siyaasadeed.

Xilalka lagu saleeyo aqoon, hufnaan iyo adeegga ummadda, ee aan lagu saleeynin magaca beesha.

Dadka ha lagu baraarujiyo in qaranku yahay mas’uuliyad qof walba leeyahay – balse qabiilku yahay mas’uuliyad ku eg deegaanka.

5.6 Tusaalayaal Cad oo Qabiilku u Dumiyay Qarannimo

■ Doorashooyinka: Beel walba waxay rabtaa “xildhibaan badan”, iyadoo aan la fiirinaynin hadduu yahay mid leh aragti qaran.



- Dagaal sokeeye: Inta badan dagaallada sokeeye waxay salka ku hayaan qabyaalad siyaasadaysan, halka sababa siyaasadeed lagu dhisay magaca beel.

- Shirkadaha gaarka loo leeyahay: Waxaa jira shirkado si qabiil loogu difaaco marka ay musuq sameeyaan ama ay wax xadaan.

Halkaas waxaa ku caddaanaysa in qabiilku yahay dhaawaca ugu weyn ee nidaam dowladeed uu qaadi karo.

Gunaanad Cutubka 5

Qabiilka marka uu ka gudbo heer bulsho, una gudbo heer dowladeed, wuxuu noqonayaa hub halis ah. Qaran lagu dhisay qabiil ma aha qaran – waa urur qabiil wada dhisan.



Soomaaliya ma yeelan karto dowlad run ah ilaa laga tirtiro nidaamka beeleysan ee laga dhigay sharciga dowlad dhisidda. Halkaan waxaa ka bilaabanaya baaq qaran: “Qabiilku ha la ixtiraamo halkii uu qaran lagu burburin lahaa.”

CUTUBKA 6: FAA’IIDOOYINKA IYO KHASAARAHA QABIILKA



Qabiilku, sida dabka, wuxuu leeyahay laba dhinac: mid kululeeya oo waxtar leh, iyo mid guba oo halis ah. Wuxuu noqon karaa hab bulsho oo dadka isku haya, balse sidoo kale wuxuu noqon karaa burbur joogto ah. Cutubkan wuxuu dul istaagayaa in si dheellitiran loo eego labadiisa dhinac – iyada oo aan loo eegin dareenka qabiil ee dadka ku beeran.

6.1 Maxaa Laga Helay Qabiilka? – Faa'iidooyinka Asalka ah

Inkastoo maanta qabiilka loo adeegsado siyaasad iyo faquuq, asalkii hore wuxuu lahaa dhowr faa'iido oo muhiim ah:

1. Ilaalinta Bulshada

Qabiilku wuxuu ahaa nidaam dabiici ah oo bulshada ku ilaalin jiray cadaaweyaasha.



Xubnaha qabiilka waxay ahayd iney is daryeelaan, isku gurmadaan, una adeegsadaan midnimo si loo badbaado.

2. Xalinta Khilaafaadka

Beelaha Soomaaliyeed waxay lahaayeen hab u gaar ah oo lagu xaliyo muranada, iyadoo la adeegsanayo odayaal dhaqameed, xeer, iyo mag.

3. Taageero Bulsho

Qabiilku wuxuu bixiyaa garab markasta oo qofku la kulmo masiibo, dil, ama xabsi — waana meesha laga helo "waa la garab istaagay."

4. Sugitaanka Nabadda Beeleed



Qabiilku wuxuu lahaa nidaamyo looga hortago colaad beeled – sida dhiig mag, heshiisyo xeer ah, iyo ilaalinta odayaasha.

5. Xidhiidhka Taariikhda iyo Dhaqanka

Waxaa laga helay silsilado abtirsiin ah oo lagu xiriiriyo taariikh, hido-dhaqan, iyo dhaxal suugaaneed.

Laakiin... halkaan ayuu ku dhammaaday faa'iidada qabiilka. Halkaas kaddib wuxuu isu beddelay qaran-dumis iyo qofnimo-dil.

6.2 Maxaa Lagu Waayay Qabiilka? – Khasaarihiisa Haliska ah

1. Kala Qaybin Dadweyne

Waxaa beel walba laga dhigay “qof gaar ah”,
waxaana la waayay aragtidii ummadnimo.

Waxaa abuurmay dareen ah “annaga iyo iyaga”,
taasoo keentay nacayb iyo kala fogaansho.

✗ 2. Dilka Kartida iyo Aqoonta

Shaqooyinka, xilalka, iyo guulaha waxaa la siiyay
dadka “qabiilka saxda ah”, halkii laga eegi lahaa karti
iyo aqoon.

Dhalinyaro badan ayaa niyad jabay sababtoo ah “ma
tihid beesha loo baahan yahay.”

✗ 3. Ku Xadgudubka Caddaaladda

Marka qof beeshaada ka tirsan uu dambi galo,

beesha kale ayaa lagu badbaadiyaa ama laga cabsadaa – sidaas darteed caddaalad ma hirgasho.

✗ 4. Musuqmaasuq Lagu Difaaco Qabiil

Marka la xado hantida qaranka, beel ayaa difaacda xadgudaha, halkii ay u hoggaansami lahayd sharciga.

✗ 5. Dagaallo iyo Colaad Joogto ah

Colaadaha beelaha badankood waxay ka dhasheen qabyaalad, dhul sheegasho, iyo xaasidnimo beeleeed.

Waxaa ku dhintay kumannaan qof oo aan waxba galabsan – sababtuna ahayd “qabiilka uu ka dhashay.”

✗ 6. Dhaqaale Xumo iyo Kala Fogaansho Gobol



Gobol walba wuxuu isku arkaa "madax banaan" — taasoo burburisay dhaqaalihii dhexe iyo wadajirka dawladnimo.

6.3 Marka Qabiilku Hogaamiyo, Qaranku Waa mid Dhinto

Markii qabiilka laga dhigay midka hagaya maamulka:

Maamulka wuxuu noqday mid beel u adeega.

Ciidanka wuxuu noqday ciidan qabiil.

Shaqada dawladda waxay noqotay “beel raacsi”.

Natiijadu waxay noqotay: dadka beel ahaan wax ku heysta ma xisaabtamaan, dadka beel ahaan loo



faquuqaya wey niyad jabeen.

6.4 Qabiilku Ma Laga Maarmi Karaa?

Haa, laakiin ma fududa. Qabiil ma baaba'ayo – balse waa la maarmin karaa haddii:

Dowladnimo dhab ah la dhiso.

Cadaalad loo siman yahay la helo.

Shacabku kor u qaado qofnimadooda kana tagaan caadifadda qabiilka.

La abuuro bulsho qaran ah oo qofka lagu qiimeeyo dadnimadiisa, kartidiisa, iyo daacadnimadiisa.

Gunaanad Cutubka 6

Qabiilku wuxuu lahaa taariikh lagu faani karo –
balse maanta wuxuu leeyahay halis laga baqo.
Wuxuu ahaa difaac – wuxuu noqday dhaawac.
Wuxuu ahaa garab – wuxuu noqday gaashaan lagu
gumaado dad kale. Wuxuu ahaa xiriir – wuxuu
noqday xuduud lagu kala go’o.

Haddii aan u isticmaalno qabiilka sidii dhaqan, waan
badbaadi karnaa; haddii aan u isticmaalno sidii
siyaasadda iyo maamulka – waxaan ku
dhammaaneynaa burbur aan laga bogsan karin.



CUTUBKA 7: QABIILKA IYO AQOONTA – LABO IS DIIDAN

Qabiilku iyo aqoontu waa labo waddo oo is diidan: mid waxay ku dhisantaa caqliga, xisaabta, iyo xaqiiqda; mida kalena waxay ku dhisantahay caadifad, laab la kac, iyo eex. Aqoonta waxay raadisaa horumar iyo sinnaan, qabiilkuna wuxuu raadshaa kala sarreyn iyo dan gaar ah. Labadoodu ma wada socon karaan; mid baa horayn kara, midna dib u dhigaya.

7.1 Aqoonta: Kaarka Caddaaladda iyo Horumarka

Aqoontu waa:



Halbeeg lagu qiimeeyo qofka

Furaha horumarka qaran kasta

Marinka caddaaladda iyo fursad wadaagga

Haddii qof waxbartay la faquuqo sababtoo ah "qabiilka saxda ah ma aha", markaas qabiilku wuxuu noqday hub lagu dilo aqoonta.

Dalka aan lagu qiimeynin aqoon, waxa lagu kala saaraa magac, dhiig, iyo sheegasho – taasna waa dhibaato bulsho.

7.2 Sida Qabiilku Uu Cadow ugu Yahay Aqoonta

Qabiilka:

Ma weydiiyo “maxaad taqaan?” – wuxuu weydiiyaa



“yaad tahay?”

Ma qiimeeyo hal-abuur – wuxuu qiimeeyaa qaraabo.

Ma oggola cid kaa karti badan haddii aysan “beesha” ahayn.

Tusaale: Haddii maanta laga helo laba qof shaqo u qalma – mid reer hebel ah, midna beel yar – waxaa la dooranayaa kii beesha ween ah, xitaa haddii uusan u qalmin. Taasi waa xasuuq aqooneed.

7.3 Dhaqan Qabiilaysan oo Aqoonta Dishay

Dhaqanka Soomaalida qaarkood wuxuu ku shaqeeyaa:

“In beel gaar ah leeyihiin xilalka ugu sarreeya.”

“In cid aan qabiilkaa ahayn aysan mudneyn in la maqlo.”

“In la xushmeeyo nin beesha ah inkastoo uu xun yahay.”

Tani waxay meesha ka saartay dhiirrigelintii dhalinyarada waxbaratay. Dhalinyaro badan waxay niyad jabeen markii la fahmay in kartidooda aysan waxba tarayn haddii aysan beel ahaan "tahay" meesha la rabo.

7.4 Siyaasiyiin Ka Cabsi Qaba Aqoonta

Siyaasi qabyaaladi waddo ma jecla qof aqoon leh:

Wuxuu ka cabsadaa in la qabto khaladkiisa.



Wuxuu ka baqaa in shacabka ay bartaan mid ka fiican.

Wuxuu rabaa dad “taageeraya”, ma ahan dad “wax garanaya.”

Sidaas darteed, wuxuu adeegsanayaa qabiil si uu uga ilaaliyo aqoonta. Wuxuu iska dhigayaa “odey beel”, isagoo aan rabin in la weydiiyo “maxaad u qabatay qaranka?”

7.5 Warbaahinta iyo Baraha Bulshada – Halyeeyada Qabiilka vs Aqoonta

Baraha bulshada iyo warbaahinta waxay marar badan sare u qaadaan:

Qof si xun u hadla, balse ah “beel caan ah.”

Qof caaya, balse taageeraya beesha saxda ah.

Qof aan waxbaran, balse cod dheer leh oo beesha u hadlayo.

Halka halyeeyada aqoonta lagu iloobo, lagana aamuso. Tani waa faquuq feker, waa “aamus aqoonta, hadal qabiilka.”

7.6 Xalka: Sidee Looga Badbaadin Karaa Cadowga Qabiilka ee Aqoonta?

Shaqaalaha iyo hogaanka ha lagu saleeyo aqoon, ma ahan beel.

Waxbarashada ha la geliyo fahamka qaranimo, iyo in aqoontu tahay awoodda kaliya ee lagu horumaro.



Dhalinyarada ha lagu baro in kartidooda aysan beel ku xirnayn.

Qabiilku ha ahaado xiriir bulsheed – balse aan loo adeegsan cadaalad-darro.

Gunaanad Cutubka 7

Qabiilka iyo aqoonta waa labo jaho oo aan isku meel tegi karin. Haddii la doonayo in Soomaaliya ay horumar gaarto, waa in laga doorbidaa qofka wax garanaya kan magac beeled wata. Qabiilku ha ahaado diin aan la taaban karin, balse aqoonta waa iftiinka kaliya ee ummad horay u qaadi karta.

Qaran lagu dhiso qabiil, aqoontu wey ka qaxdaa. Qaran lagu dhiso aqoon, qabiilkuna wuu is daba qaadaa.



CUTUBKA 8: MAXAA SABABA IN QOF QABIIL KU FAKARO?

Qabiilku ma ahan kaliya magac, mana ahan xiriir reernimo oo fudud – waa hab fakir, hab dareen, hab siyaasad, iyo hab nololeed. Qofka marka uu qabiil ku fakaro, waxaa sal u ah cilmi-nafsi, dhaqan ku dhisan cabsi, iyo duruufo nololeed oo uu ka dhaxlay



bulshada uu ku dhex nool yahay.

Marka aad qof su'aasho: "Maxaad u difaacaysaa qabiilkaaga xitaa marka uu khaldan yahay?" – jawaabtiisu ma sal laha. Laakiin waxaa jira sababahaan hoose oo qoto dheer.

8.1 Cabsi iyo Xanuun Taariikheed

Soomaalidu waxay soo mareen:

Dagaalo sokeeye oo lagu laynayo dad kaliya sababtoo ah qabiilkooda.

Faquuq beeled oo laga dhigay nidaam dowladeed.

Ku tumasho sharci iyo xuquuq beeled.

Natiijadu waxay noqotay in beel walba u aragto



qabiilkeeda inuu yahay garka kaliya ee ay ku badbaadi karaan. Tani waxay abuurtaa cabsi taariikhi ah: haddii aanan qabiilkayga la safan – cid kale iima naxeeyso.

8.2 Dhaqan Laga Dhaxlay

Qof walba wuxuu ku koray deegaan:

Aabihii, hooyadii iyo odayaashiisu ay u kala soocayeen dadka “reer hebel” iyo “annaga”.

Loo sheegay in “qabiilka kale” aanu wanaag lahayn.

Loo xardhay sheekooyin aan run ahayn, balse lagu cabsi gelinayo ama lagu kibrinayo.

Hadal aanan is ogayn ayuu qofku baranayaa: “Anaga



waan ka fiicanahay reer hebel.”

Marka qofkaas uu koro, si toos ah ama si dadban, wuxuu u qaataa fikirka qabiilka in uu yahay run iyo xaq.

8.3 Jiritaan Bulsho oo Lagu Dhisay Qabiil

Dadka Soomaaliyeed badankood:

Waxay helaan shaqo iyagoo loo eegayo beesha ay ka soo jeedaan.

Waxay helaan guur iyagoo lagu qiimeeyo cida ay yihiin.

Waxay helaan taageero marka ay dhibaateysan yihiin – beel ahaan, ma ahan bini’aadannimo ahaan.

Natiijada: qofku wuxuu dareemaa jiritaan beeled oo uu ku tiirsan yahay. Taasi waxay dishaa in uu dareemo inu yahay qof Soomaali ah oo xor u ah fakarkiisa.

8.4 Cilmiga Nafsiiga ee Qabyaaladda – “Qabiil Ku Fakarid” Waa Cudur Maskaxeed?

Waxay u egyihiin:

Cudurka “inferiority complex”: Qofku wuxuu dareemaa in haddii uusan sheegan qabiilkiisa, uu yahay qof aan waxba ahayn.

Cudurka “superiority complex”: Qof kale wuxuu dareemaa in beesha uu ka yimid ay ka sareeyso dadka kale – xitaa haddii aysan jirin sabab cilmi ah.

Cudurka “identity crisis”: Qof aan lahayn waxbarasho,



shaqo, ama matalaad qaran, wuxuu ku xasilo magaca qabiilka – oo uu ka helo “muuqaal been ah.”

8.5 Dhaqaale Xumo iyo Raja La’aanta .

Qabiilka wuxuu noqday meel lagu raadsado:

Xil iyo xil doon.

Shaqo iyo qandaraas.

Guur iyo xiriir bulsho.

Qofka markuu waayo nidaam hufan oo dawladeed, markuu waayo caddaalad iyo sinaan – wuxuu u laabtaa qabiil. Waa difaac been ah, balse nafsi



ahaan wuxuu u noqdaa “ilaaw murugada.”

8.6 Diinta Oo La Dayacay

Qabiil ku fakaridda waxaa lagaga bixi lahaa:

Diinta Islaamka oo qabyaaladda si cad u xaramisay.

Suubanaha (NNKH) oo yiri:

“Qofkii ku faana qabiil ha noqdo sida cayayaanka hoosta laga gurayo.”

Laakiin marka diinta laga doorbido caadifad, wuxuu qofku doortaa qabiil halkii uu ka dooran lahaa caddaaladda Ilaahay.

8.7 Xal: Sidee Loo Joojin Karaa Fakarka Qabiilka Ku

Saleysan?

Waxbarasho maskax beddesha: Baro dadka cilmi nafsiga ah ee ka hadlay dulmiga qabiilka.

Hoggaan aqoon leh oo ka madax bannaan beel: Haddii qofka hogaamiyaha ah qabiil xambaarsan yahay – shacabka wuu sumeynayaa.

Abuurid bulsho qaran u fakaraysa: Dhalinyarada, ardayda, haweenka – ha lagu baro in la iska ilaaliyo falka iyo fikirka qabyaaladda.

Diinta ha laga dhigo tiirka lagu saxo khaladka bulshada.

Gunaanad Cutubka 8



Qofka qabiil ku fakara ma aha mid xun, balse waa mid ay duruufuhu u qariyeen runta. Waa mid laga dhaxlay cabsi, dhaqamo khaldan, iyo rajada la'aanta nidaam dowladeed.

Laakiin haddii aan ognahay sababta cudurka u yimid – waa inaan raadinaa daawadiisa. Qof walba wuxuu leeyahay karti inuu iska daayo fakarka qabiilnimo, haddii uu doono.

**CUTUBKA 9: HALKAAN KA BILAABAYNAA
ISBEDDELKA – SIDEEN U TIRTIRI KARNAA**



QABIILKA?

Wax la og yahay in qabiilku yahay cudur; wax laga naxo in lagu faano; wax laga caroodo in lagu qoray dastuur; wax laga xishoodo in lagu xusho shaqo ama xil. Laakiin in la og yahay ma filna – waa in la dhaqaaqaa.

Qabiilku si buuxda ugama baaba'ayo bulshada – balse wuu ka bixi karaa qalbiga iyo maskaxda haddii dadaal dhab ah la sameeyo. Waa waqtigii la weydiin lahaa: sidee u joojin karnaa qabyaaladda?

9.1 Tallaabada 1: Fahamka Cudurka – “Magaca Beesha Maaha Awood”

Markii hore qabiilka waxaa loo arkayay:

- Ilaalin

- Difaac

- Sumcad

- Garab

Laakiin maanta:

- Waxaa laga dhaxlay dagaal

- Cadaalad darro

- Musuq

- Kala qoqob

Tallaabada koowaad waa in qof walba u aqoonsado

qabiilka inuusan aheyn badbaado – ee uu yahay caqabad hortaagan kartidiisa.

9.2 Tallaabada 2: Ka Bilaaw Naftaada

Isbeddelka lagama bilaabo dowladda, lagama bilaabo siyaasiyiinta – waxa uu ka bilaabmaa qofka.

- Jooji in aad dadka ku qiimeyso qabiilkooda.

- Ha ku faanin magaca beeshaada.

- Ha faafin sheekooyin qabiil ku saleysan.

- Ka jooji carruurtaada iyo qoyskaaga iney adeegsadaan weedho qabyaaladeed.

- Isbeddelka qaran wuxuu ku bilaabmaa qofka



gurigiisa jooga.

9.3 Tallaabada 3: Waxbarasho Xor Ah oo Aan Qabyaalad Lahayn

Waxbarashada ha noqoto mid wacyi gelin ah – oo ka hadasha burburka qabiilka.

Ha lagu daro manhajka dugsiyada fasallada lagu barto midnimada, sinnaan iyo dhibaataada faquuqda.

Jaamacadaha ha yeeshaan dood furan oo qabiilka lagu burburiyo, laguna beddelo maskax qaranimu.

Qabiilka laguma jebiyo xabado – waxa lagu jebiyaa aqoon, dadnimo, iyo damiir.

9.4 Tallaabada 4: Diinta Ku Laabo – Ilaahay Wuxuu

Qiimeeyaa Taqwada, Maaha Qabiilka

Masaajidda ha laga wacyi geliyo dhibaataada qabiilka.

Culimada ha adeegsadaan mimbarada si ay u abuuraan bulsho isku mid ah.

Qur'aanku wuxuu yiraahdaa:

"Qofka ugu sharafta badan Ilaahay agtiisa waa kan ugu dhawrsan." (Surat Al-Hujurat: 13)

Qofka aan qabiil sheegan waa mu'min ka xor ah caadifad been ah.

9.5 Tallaabada 5: Hoggaan Lagu Doorto Kartida, Maaha Qabiilka



Siyaasiyiinta ha lagu doorto aragtidooda,
barnaamijkooda, iyo daacadnimadooda.

Xilka ha la siiyo qofka u qalma, ma ahan kan la
leeyahay “waa wiilkii reer hebel.”

Ha la dhiso nidaam doorasho oo qof walba codeyo
oo shacabka u siman yahay – kana madax bannaan
qaab beeleeedka 4.5.

Hoggaan ku yimid qabiil waa burbur – hoggaan ku
yimid karti waa badbaado.

9.6 Tallaabada 6: Dhaqanka Warbaahinta – Ha Korin
Qabiil, Kor Aqoon iyo Midnimo

Baraha bulshada ha laga tirtiro magacyada beelaha
lagu faanayo.

Saxaafadda ha laga wacyi geliyo sidii ay u joojin lahayd sheegashada iyo u kala eexashada beelaha.

Ha la abuuro filimaan, sheekooyin, iyo heeso mideeya shacabka – oo qabiilku ku noqdo ceeb la fogeeyo.

9.7 Tallaabada 7: Abuurid Bulsho Isku Duuban oo Aan Ku Shaqeyn “Annaga iyo Iyaga”

U guurso cidda aad jeceshahay – ha eegin qabiil.

U shaqee qof kasta – ha fiirin magaciisa ama beesha uu ka yimid.

Kor u qaad dhaqanka “walaaltinimo Soomaaliyeed”, halkii laga xoojin lahaa kala reebka qabiileed.



Bulsho isku duuban uma baahna qabiil – waxay u baahantahay kalsooni iyo caddaalad.

9.8 Waa Maxay Natijada Haddii Tallaabooyinkaan La Qaado?

Dhalinyarada waxay heli doonaan rajo aan beel ku xirneyn.

Dowladdu waxay noqon doontaa mid caddaalad ku dhisan.

Bulshadu waxay dareemi doontaa in qofnimada ka sarreyso qabiilnimada.

Qaranimadu waxay dib u helaysaa macnaheeda.

Waa markaas marka “Soomaali” ay noqoto magaca

kaliya ee la isku qiimeeyo.

Gunaanad Cutubka 9

Qabiilka ma aha awood aan laga adkaan karin – waa caado la jebin karo, waa fikir la beddeli karo, waa cudur la daaweyn karo. Laakiin waxay u baahan tahay hal shay: in qof walba bilaabo isbeddelka naftiisa.

Haddii aan sugi doono siyaasiyiinta – waxayna sugi doonaan qabiiladooda. Laakiin haddii aan bilaabi doono maanta – mustaqbalka wuu dhismayaa.

“Isbeddelka aad raadineyso – naftaada ka bilaaw.”

CUTUBKA 10: HADDII AAN KA TAGNO QABIILKA – MAXAA DHACAYA?



Su'aal miisaan culus leh, balse aan la is weydiin:

“Maxaa dhici kara haddii Soomaaliya ka guurto nidaamka qabiil ku dhisan, ugana gudubto mid ku dhisan caddaalad, sinnaan, iyo karti?”

Waxaa dhici kara mucjiso – waa haddii aan ka go’no. Waxaa imaan kara dowlad lagu kalsoon yahay, dhalinyaro leh rajo, bulsho aan is nacayn, iyo qaran ku dhisan dadnimada, ee aan ku dhisneyn “yaa tahay.”

10.1 Dowladda Laga Dareemayo Dhammaan Dadka

Haddii aan ka tagno qabiilka:

Madaxweynaha wuxuu noqon karaa qof lagu doortay kartidiisa darteed – ee maaha magaca beesha.

Wasiirrada iyo maamulayaasha waxay noqonayaan



kuwa ugu aqoonta badan – ee aan lagu xulan “4.5”.

Ciidamada waxay u adeegayaan qaranka, ma ahan “beesha kugu badantahay.”

Garsoorka wuxuu noqdaa mid runta xukuma – ee aan ku shaqeyn qabyaalad qoran.

Markaas ayuu shacabka dareemayaa: Dowladda waa aniga.

10.2 Dhalinyarada Oo Rajo Yeelanaya

Haddii dhalinyaradu fahmaan in kartidooda lagu qiimeynayo – waxay baranayaan, shaqeynayaan, iyo sameynayaan horumar dhab ah.

Dhalinyarada ayaa noqda laf-dhabarka horumarka,

ma ahan “xoog beeled ama dhallin qabiil difaaceed.”

Qabiilka laga tago = maskaxda la furo = hal-abuurka la fasaxo.

10.3 Dhaqaalaha Dalka Oo Furfuranaya

Haddii qabiil laga tago, ganacsiga waxaa geli kara qof walba, lagama xigo magaca beesha.

Maalgashadayaasha dibadda waxay ku iman karaan kalsooni, maadaama aysan la kulmayn beelo “qandaraaska leh”.

Hantida qaranka waxay u adeegaysaa shacabka oo dhan – ma ahan hal koox oo magaca beel wax ku haysata.



Qaran caddaalad leh = dhaqaale kobcaya.

10.4 Horumar Siyaasadeed Oo Dhab Ah

Axsaab siyaasadeed oo ku saleysan mabda' – maaha “beel hebel baa mataleysa.”

Doorasho lagu saleeyo fikir iyo barnaamij – maaha codayn qabiil.

Mucaarad iyo muxaafid sal u ah danta ummadda – maaha beelo is neceb.

Markaas ayay siyaasadda Soomaalida noqonaysaa mid xor ah, karti ku dhisan, hufnaan leh.

10.5 Walaaltinimo Bulsho Oo Dhab Ah



Nin gobol kale ka yimid wuxuu ka guursan karaa gabar ka soo jeeda meel kale, iyada oo aan la dhihin “waa dad kale.”

Gabar magaalada ku dhalatay, waxay ka shaqayn kartaa tuulo xuduudda ku taalla, iyadoo aan cabsanayn “ma aha beeshayda.”

Qofkasta wuxuu dareemayaa in uu yahay muwaadin Soomaaliyeed – oo leh xuquuq siman, meelkasta oo uu joogo.

10.6 Quruxda Midnimo Soomaaliyeed

Marka aan ka tagno qabiilka:

Gabayada waxay noqdaan kuwo mideeya.



Heesaha waxay noqdaan kuwo qaranimo xambaarsan.

Sheekooyinka waxay noqdaan kuwo aan kala saaraynin “reer hebel iyo reer hebel kale.”

Dowladda waxay noqotaa dad u shaqeysa shacabka, maaha beelaha.

10.7 Maxay Tahay Muuqaalka Soomaaliya Haddii Qabiilka Laga Guuro?

Soomaaliya waxay yeelan kartaa dowlad awood leh.

Waxay noqon kartaa dal ay maalgashadaan dalalka kale.

Waxay noqon kartaa ummad Afrika tusaale u noqota

– sida Rwanda kadib xasuuqii.

Waxay dhalin kartaa Nobel Prize, All-African champions, iyo aqoonyahanno dunida beddela.

Soomaaliya qabiil la'aan ah = Soomaaliya weyn oo sharafta leh.

Gunaanad Cutubka 10

Haddii aan ka tagno qabiilka:

Waxaan heleynaa dowladnimo dhab ah.

Waxaan helaynaa sinnaan.

Waxaan helaynaa horumar.



Waxaan helaynaa nabad.

Waxaan helaynaa bulsho jacayl isku ah.

Waxaan helaynaa qaran.

Waa waqtigii aan dooran lahayn: Qabiil oo aan isku cunno, mise qaran oo aan isku dhisno.

✅ Buugga “4.5 WAA QARAN DUMIS” halkaan ayuu ku dhammaaday, laakiin halganka maskaxda dad caqliga badan hada unbey fikir bilawday.

"Ka tag qabiil waa kan qalibay dalkage".

